Dabka rashka Minnesota

Dhaawaca dabka rashka ayaa markasta sare u kacaya Minnesota. Shantii sano ee ugu dambaysay iyado rashka oo idil ay sharci darro ka ahayd Minnesota, (1997-2001) qololka deg-degga waxaa gaaray qiyaastii 28 dabka rashka ku dhaawacmay bilihi Juunyo iyo Luuliyo sanad kasta. Laga billaabo 2002, markii rashka hawada iyo kan aan qarxin la sharciyeey intii lagu jiray 2007 tirada dhexe ee dhaawacyada waa 90 sanadkiiba. Lama ogaan karo inta dhaawacantay oo aan helin gargaar caafimaad.

Juuniyo iyo Luuliyo ee 2007, rashku ayaa sababay 141 dab ugu kacay milkiilayaasha cel-celisahaan $2,132 kiiba.

Dadka rashka isticmaala waa in aanay isticmaalinn hantida guud (sida beeraha nasashada, jidadka, jidadka yar, dugsiyada, hantida dawladda iwm). Dadka iibsada rashkaas waa inay jiraan ugu yaraan 18 sano, iyago wixii faah-faahin looga baahanyahay la tusinayo aqoonsi sawir leh.

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

AMMAANKA DABKA-DABBALDAGEED KA



Gantaalha Dabka Kafladaha ay Wada Casaadaan...

U DABBAALDAG MADAXBANNAANIDAADA!

Maxaan ka samayn karaa?

Rashku sanad kasta dhawacyado badan ayuu sabab. Xeraarka badbaada ee soo socda ayaa la bixiya si loo dhimo dhaawacyada rashka, dabka iyo cabashooyin aan dhammad lahayn.

• Aqriso, faham iyo raac waxa uu qalab kasta yahay inta aadan isticmaalin.

• Isticmaal rashka meel dad kormeeri karo.

• Dooro meel ammaan ah si rashka aad u isticmaashid taaso ka fog wax kasta oo adeegsiga si toosa iyo si dadbanba waxyeeli kara aalad kasta. Rashka waa in lagu daaraa dibadda kana fog xayawaanka, dhismayaasha, bakhaarada, booyadaha, geed-gaabka iyo alaabada guban karta.

• Qofkasta oo u dhaqmaya si xilkasnimo darro ah, ama u muuqda inu uu cabsanyahay ama mukhaadaraad kale ma aha in uu qaado ama siidaayo rashka.

• Ku hay rashka meel ka fog caruurta yar-yar, kuna xafid meel qabow oo qallalan kana fog ilaha laga shido (kululeeyaha iyo holaca). Rashka waa in aan la oggolaan inu qoyo iyo in aan la isticmaalin markuu qallalo qoyaanka dabadeed.

• Rashka jeebkaada ha ku qaadan ama qofahaantaadaba.

• Gumadka sigaarka, siigarka, beebka iyo holaca furan waa in laga fogeeyo rashka marka uu iibka yahay iyo marka la kaydinayo.

• Marna ha ku shidin rashka gudaha shay kale oo wax ku jiraan, sida dhalo ama qasac dhexdiis.

• Wax indha dhowraya ayaa lagula talinayaa kuwa isticmaala rashka. Marna ha tuurin rashka ama adigo ugu danle qof kale, xayawaan ama dhismo.

• Hal rash daar markiiba, ka bacdina si deg-dega uga fogow aaladda markiiba. Bannee aalad kasta oo la daaray, hasayeeshe dib u qarxi karta.

• Haddii aalada rashka la daaray laakiin ay qarxi karto ka bannee aaladda waqti dambe si looga hortago dhaawac, hawluhu haba daaheene. Biyo ku qoy aaladda inta aadan gacanta ku qaban.

•Marna ha saarin meel ka mid ah jirkaada, gaarahaan madaxaaga rashka dushiisa marka aaladdu iftiimayso. Shayga ka qaabil xaga dhinaca dabadeedna daar adigoo madaxaaga shayga ka fogeynaya.

• Marna dib ha u daarin rash xumaaday. Wargeli cillad kasta iibiyihii ama Consumer Product Safety Commission.

• Marna ha ku tijaabin rashka, sameyso rashkaada ama siyaabo kale (mamnuucid culus ee federal ah ayaa ka jirta hawlahan oo kale).

Tusaale waxyaabaha la oggolyahay oo ay ku jiraan waxa bir-birqaya, shay toobinka u eg iyo qasabadaha sii daaya wax bir-birqaya ayaa waxyaabaha la isku qurxiyo sida siligga iyo ubaxa macmilka xafladha.

Waxyaabaha qarxa iyo fiilooyinka rashka mamnuuca ka ah iibka dadweynaha, haysashada iyo in laga isticmaalo Gobolka. Minnesota. Rashka la mamnuucay waxaa ku jira, laakiin aan ku koobnayn rashka qarxa, gantaalaha, sawaariikhda, shumuca romaanka, hoobiyaasha iyo rasaasta.

Fadlan dib u eeg liiska tusaalaha rashka sharciga ah iyo kuwa sharci darrada ah WWW.FIRE.STATE.MN.US

Masuuliyada Shaqsiga

Giddigeen masuuliyad ayaa naga saran si loo hubiyo ammaanka nafteenna iyo kuwa hareeraheena ah. Dhigidda tusaale wacan iyo samaynta qaab masuuliyadeed oo naga caawimaya sidii aan uga raaxaysan lahayn dabbaaldegyada khatar la'aan.

KA QAYBGAL BANDHIGGA DABISHIDKA XAFLADHA GUUD